Diyaarin f137

2024/03/22

Wasaaradda Waxbarashada Hiddaha & Tacliinta Sare

Xafiiska Imtixaanaadka iyo Shahaadooyinka Qaranka

Imtixaanka Fasalka 4aad ee Dugsiga Sare

MAAJO 2023

MAADDADA: Af Soomaali

WAQTI: 2 SAACADOOD

FADLAN JAWAABAHA KU QOR BUUGGA JAWAABAHA:

QAYBTA 1AAD: SHEEKO:	**20 dhibcood**
QAYBTA 2AAD: NAXWE:	**24 dhibcood**
QAYBTA 3AAD: SUUGAAN:	**30 dhibcood**
QAYBTA 4AAD: EREYO:	**10 dhibcood**
QAYBTA 5AAD: CURIS:	**16 dhibcood**

QAYBTA 1AAD: SHEEKO (20 dhibcood)

NABAD BAA NOLOL LEH




Beri baa waxaa meel wada deganaa laba qoys. Labada qoys mid ka mid ah waxa u joogtay gabadh la yidhaa Filsan oo quruxda iyo qiimaha uu Alle siiyey dhallintu ay kaga sheekaysato goobaha lagu caweyso. Qoyska kale waxaa aabbe u ahaa suldaanka beesha oo aad looga danbeeyo laguna magacaabo Suldaan Samawade.

Suldaan Samawade waxa uu dhalay isna wiil hanaqaad ah oo magac iyo maamuus ku dhex lahaa barbaarta degaanka. Intaa waxaa dheer qoyska wiilku ka dhashay waa qoys uu ALLE barwaaqeeyey oo maal adduunyo iyo moodba leh, waana reer ku caan baxay sadaqadda, samajacaylka iyo nabad ku soo dabaalidda degaanka.Xilligu waa barwaaqo oo dad iyo duunyaba waxaa lagu noolyahay nolol raaxo leh. Dhayda geela reeraha oo dhan ayaa la gaadhsiiyaa, dhanaankanna waa la safriyaa. Caanaha geesleyda subaga ayaa laga lulaa oo reeruhu sixin ayey wax ku cunaan.



Suldaankii Beesha ee wiilka dhalay ayaa waxaa dheGihiisa ku batay gabadha Filsan ah ammaanteeda, waxa uuna go'aansaday in uu wiilkiisa u doono, kana dhiibo wixii maamuus iyo sharaf ah ee ay lahayd gabadh filkeeda ahi. Suldaankii wiilka dhalay waxa uu u tagey Filsan aabbaheed, waxa uuna ku yidhi waxa aan ka imid reer in badan nabad iyo barwaaqo ku noolaa oo ALLE u nimceeyey, waxaanan u imid dhaqan soo jireen ah oo in gabadh la iska soo doonto ah, waxa aanan kaaga fadhiyaa in aad gabadhaada Filsan ah I siisaan, una guuriyo wiilkayga Faarax.



Intaa ka dib waxan jeclaan lahaa in aan wada qaybsano nabadda iyo nolosha aan ku caano maalnay. Filsan aaBbaheed waxa uu u jawaabay suldaankii, waxa uuna yidhi nabad baa aayo leh oo isku keen keentay, haddaanay jirinna Filsan lama soo doonteen, barwaaqana lama haysteen. ALLE ha inoo siyaadiyo barwaaqada aan haysano ee suldaanow aan la soo tashado gabadha hooyadeed oo aan looga maarmin talada iyo aayaha Filsan. Filsan aabbaheed waxa uu u

tagey ooridiisii oo lagu magacaabi jirey Cambaro, wuxuuna ku yidhi war nabad ah iga hoo.

Maanta waxaa ii yimid Suldaan Samawade oo u doonaya gabadheena Filsan wiilkiisa Faarax, waxaana shiki aan lahayn in reerku u qalmo gabadheena ee bal Cambaroy maxay adiga kula tahay? Cambaro waxa ay odaygeedii ku tidhi "*aw Samatarow horta anigu waxba kama qabo in filsan loo guuriyo wiilka Suldaan Samawade, balse aan is wareysanee wiilku waa wiil caynkee ah*"? ma yahay wiil saddexdan nin midkood ah

Nin hub la'aan dagaalami kara
Nin hoy la'aan seexan kara
Nin hanti la'aan dharga.

Akhri sheekada kor ku qoran, ka dibna dooro warcelinta saxda ah (10 dhibcood)

1.Suldaanka Beesha wiilkiisa waxaa la odhan jiray

B. Geeddi (T) Faarax J. Samatar (X) Samawade

2.Qoyska wiilku waxa uu ku can baxay

B. Hantida T.Dagaalaka J. Wanaaga (X) Sadaqadda

3. Suldaan Samawade waxaa ku dhaliyeey doonista filsan

B. Naxaristeeda T. Qaraaba nimadeeda (J.) Quruxdeeda X. Qoyskeeda

4. Reeruhu waxa ay wax ku cunaan

B. Subag (T) Sixin J. Caano X. Saliid

5. Gabadha Faarax Suldaan loo doonay waxa ay ahayd Gabadh:

(B.) Qurux iyo qiima leh T. Gaaban J. Dabeecad xun X. Aqli badan

6. Xilliga faarax gabadha loo doonay waxa ay ahayd xilli

B. Abaar ah T. Nabad ah J. Colaad ah (X.) Barwaaqo ah

7. Faarax aaBihii waxa uu ahaa nin

B. Sabool ah (T.) Suldaan ah J. Bakhayl ah X. Caan ah

8. Sannadka Faarax gabadha loo doonay dhanaanka xoolaha waa

(B.) La safrin jiray T. La cabbi jiray J. La daadin jiray X. Sadaqayn jiray

9. Suldaank beesha waxaa la odhan jiray Suldaan

B. Cali T. Samatar (J.) Samawade X. Saalax

10. Suldaanku markii uu gabadha doonayey waxa uu u tagey

B. Abtigeed (T.) Aaabbaheed J. Wallakeed X. Hooyadeed

Keen ereyadan laga soo xulay sheekada ereyo la macno ah (5 dhibcood)

11. Maamuus — Eiwaan — Xushmad — Qiimo ama Waxtar
12. Qaayo
13. Barwaaqo — Baraaro
14. Duunyo
15. Barbaar — Hanti maal

Dhamaystir weedhahan adiga oo akhrinaya sheekada (5 dhibcood)

16.Labada qoys mid ka mid ah waxaa u joogtay gabar

17.Dhayda geela oo dhan ayaa la gaadhsiiyaa

18.Suldaanow aan la soo tashado gabdha hoyadeed

19.Cambaro waxa ay odaygeeda ku tiri Samatarow horta anigu waxba kama gabo in

20. Ma yahay wiilku saddexdan nin Midkood ah filsan loo guuriyo willka suldaan sama wade.

QAYBTA 2AAD: NAXWE (24 dhibcood)

GOOBAGELI

21. Sheeg saddexda qaybood ee naxwaha af Soomaaliga.

22. Ka soo saar labada fal iyo xidhiidhiyaha ku jira weedhan

<Haddii aad timaado, anna waan imanayaa>

23. Qor saddexda falkaab ee ku jira qaybahan

< iyo, sii,la,aad,ugu,aayar>

24. Ka soo saar qodobadan, saddex qodob oo magaca dheddig uu qaato

< ka,ta.sha,ha,da,ga>

25. Ka soo saar weedhan magaca guud, midka gaarkaa iyo falka ku jira

- Axmed waa arday dedaal badan

U beddel weedhan fal taagan adiga oo adeegsanaya magac u yaalka (idinku)

26. Waxa aan tagi doonaa kismaayo

U beddel weedhan kelida ah wadar adiga oo adeegsanaya xidhiidhiye

27. Waxa aan dhigtaa jaamacad

28. Faallo ka bixi farqiga u dhexeeya magac dahsoon iyo magac muuqda

QAYBTA 3AAD :SUUGAAN (30 dhibcood)

Goobageli (4 dhibcood)

29. Gabayga difaac qaran waxa curiyey Abwaan:

B. Hadraawi T. Gaariye (J.) Kaariye X.Dhoodaan

30.(*Inkastoon sabool ahay, haddana waan sariigtaa sacabada ma hoorsado)* waxaa suugaan ku yidh Abwaani:

(B.) Yamyam T. Dhoodaan J. Hadraawi X. Sangub

Page 168

Ku hor qor magacyadan mid kasta hees-howleedkiisa (8 dhibcood)

Geela, lo'da, adhiga iyo beerta.

31	Xayle duugii kuu xidigin jiray xareed baridiyo xays inoo sheeg	Loida
32	Walee jeeni halaq haddaad hayshiyo horaadada lulin walee la haryoo walee la hallow	Adhiga
33	Geeridaadana gaawa madhan iyo gaajo laga qaad	geela
34	Ma ku maaweeliyaayoo madadaalo nin wayn iyo maad ma kuu tiriyaa	beeraha

Akhri maansadan oo ka war celi weydiimahan (6 dhibcood)

- Mar habeenku dhaxan wadan
- Dharaartiina kululayn
- Dhexdhexaad hawadu tahay
- Oon dhac iyo duulaan
- Dhawr bahal lahaynoo
- Reeraha is dhinac yaal
- Dhaabadoodu nabad tahay
- Maalkiina ugu dhalay
- Oo dhiilo waawayn
- Dhanaan iyo dhitiyo ciir
- Gooni loogu kala dhigay.

35.Soo koob dulucda saddexda tuduc ee ugu horreeya maansadan

36.Qeex macnaha ereyada ***dhito iyo ciir***

37. Waa maxay macnaha tuduca (maalkiina ugu dhalay)

38.Qor laba maahmaahood oo ka hadlaya qiimaha iskaashiga (4 dhibcood) p—198

39. Miisaan meeriskan soo socda(4 dhibcood)

Diingaraaradii nagu dhacdiyo, webi dabaashiisa

40. Faallo ka bixi waxtarka saddexda ay maahmaahdani sheegayso(4 dhibcood)

Nin wiil fiican lihi ma ciidan yara.

Nin rati fiican ma geel yara.

Nin oori fiican u dhaxday ma nacfi yara.

QAYBTA 4AAD: EREYO (10 dhibcood)

Isku beeg ereyadan iyo macnahooda(6 dhibcood)

T	Erey	T	Macnihiisa
41	Hanfi	44	Wananka iyo orgida jarka ah ee laga ganacsado
42	Tigaad	45	Ujeedada iyo biyo dhaca hadalka
43	Huuri	46	Socodka xooluhu marka ay is bada galaan
44	Ahmin	43	Doon yar oo lagu kalluumaysto
45	Hawraar	41	Dabayl kulul
46	Ormayn	42	Daaqa ama cawska xooluhu daaqaan

Page 127

Page 19

form one page 34

47. Wadaree magacyadan(4 dhibcood)

- Aqal → Aqalyaal
- Waddo → Wadooyin
- Kalluun → Kalluumo
- Qore → Qorayaal

QAYBTA 5AAD:CURIS (16 dhibcood)

48.Ka qor curis ka kooban ugu yaraan 300 boqol oo erey mid ka mid ah mawduucyadan soo socda

- Waxyeelada maandooriyaha qaadka
- Saamaynta adeegsiga baraha bulshadu ay ku leeyihiin ardayga

Dhammaad:

QAYBTA 2AAD: NAXWE (GOOBAGELI)

21. Sheeg saddexda qaybood ee naxwaha af Soomaaliga.

1) Codadka

2) dhismaha weeraha

3) Qeybaha hadalka

22. Ka soo saar labada fal iyo xidhiidhiyaha ku jira weedhan

<Haddii aad timaado, anna waan imanayaa>

=) Falka waa (Timaado iyo imanayaa)

=Xidhiidhiyaha waa (anna)

23. Qor saddexda falkaab ee ku jira qaybahan

< (iyo, sii, la,aad, ugu, aayar)>

= Saddexda falkaab waa (sii ,aad iyo aayar)

24. Ka soo saar qodobadan, saddex qodob oo magaca dheddig uu qaato

<(ka,ta.sha, ha, da, ga)>

= Saddexda magac dhiddig (Ta, da iyo sha)

25. Ka soo saar weedhan magaca guud. midka gaarkaa iyo falka ku jira

+ Axmed waa arday dedaal badan

=) magaca guud waa: ARDAY.

=) Magaca gaar Waa :AXMED.

=) Falka ku jira waa DEDAAl.

U beddel weedhan fal taagan adiga oo adeegsanaya magac u yaalka (idinku)

26. Waxa aan tagi doonaa kismaayo

= idinku waxaad hada tageysaan kismaayo.

U beddel weedhan kelida ah wadar adiga oo adeegsanaya xidhiidhiye

27. Waxa aan dhigtaa jaamacad

= Waxaan dhiganaa jaamacad sidookale. N.B

28. Faallo ka bixi farqiga u dhexeeya magac dahsoon iyo magac muuqda

= Magaca daahsoon: waa magac fikradeed oo aan lataaban karin sida been, run , rajo falsafad , diin, IwM.

= Magac muuqda : waa magac fikradeed oo la taaban karo sida AXMED, maxamed, qalin, Buug , boorso iwn.

35 . Soo koob dulucda saddexda tuduc ee ugu horreeya maansadan

= Xilli barwaaqo ah iyo nabad lagu jiro

38) Qeex macnaha ereyada dhito iyo ciir

= Dhito : waa caano loo keydiyey in la lulo ama la dhamo.

= Ciir : wàa caano la lulay oo subagii laga bixiyay.

37 N.B

38 . Qor laba maahmaahood oo ka hadlaya qiimaha iskaashiga ?

= Ilko wadajir bay wax ku gooyaan.

=) Far keligeed fool madhaqdo .

= Miyir kaa maqan maskax walaal ayaa laga helaa.

39. Miisaanka meeriskan soo socda

Diingaraaradii nagu dhacdiyo , webi dabaashiisa.

= 13+ 8 = 21 waa gabay

40 . Faalo ka bixi waxtarka saddexda ay maahmaahdani sheegayso

Nin wiil fiican lihi ma ciidan yara

Nin rati fiican ma geel yara

Nin oori fiican u dhaxday ma nacfi yara.

= Jwb: Micnaha nin will fiican lihi ma ciidan yaro: wiilka waa garab lixaad leh dhanka qoyska markii la joogo miiga waayo dhanka soofinta xoolaha, tacabka beeraha.

= Macnaha nin rati fiican lehna ma geel yara: waa ratiga waa gadiidka dhulka misna waa xoolaha soomaalida kan ugu waxtarka fiican.

= Micnaha nin naag fiican u dhaxdana ma nafci yara; waa dumarka wax yaabo badan bay ka haysaa rerka dhanka u badka ka war qabka hanti, iyo xannaaneynaya raggooda.